AMAAHDA ALAABTA GURIGA

CSN FAKTABLAD 2010 SOMALISKA

YAA AMAAHDA LOO OGGOL YAHAY, MAXAASE LOO ADEEGSADAA?

Qaxootiga iyo qaar ka mid ah shisheeyaalka u soo guuro aqal ayaa codsan karo amaahda lagu iibsado alaabta guriga. Shuruuda amaahda waxaa ka mid ah: waa in qaxootigu ay da' diisa ka saraysaa 18 sano, lagana diiwangeliyay "Xafiiska Qaabbilaadda Qaxootiga ee Degmada".

Waxaa amaahda laguu oggol yahay haddii aad u guurtid aqal alaabta guriga taallo amase aan oollin iyo haddii aad qol aqal ka kireysato. Amaahda waxaa loogu tala galay in lagu iibsado qalbka jikada iyo alaabta guriga iwm. Amaahdu loogu ma' tala gelin in kirada la'aysaga bixiyo amase cunto lagu iibsado.

GOORMAA AMAAHDA LA QAADAN KARAA?

Arjiga amaahda alaabta guriga, waa in aad soo gudbisaa muddo laba sano gudaheed, taaso laga bilaabo goorta ugu horreysay ee degmo lagu dejiyey. Shuruudaha codsiga dhameystirka amaahda wa isla kuwa kor ku xusan.

HEERKA LACAGTA AN AMAAHAN KARO WAA INTEE?

Heerka lacagta amaahda wuxuu xiriir la leeyahay tirada qoysku iyo haddii aqalku u yahay mid alaabaysan iyo haddii kale iyo haddii aad hanti leedahay iyo haddii kale. Waxaad had iyo goor codsan kartaa heer ka hooseeyo heerka ugu badan.

Tirada qoyska	Guri aan alaab oollin Heerka lacagta ugu badan lyado karoon ah	Aqal alaabaysan/ qol kireyste
1	15 000	5 000
2	20 000	5 000
3	25 000	5 000
4	30 500	5 000
5	35 000	5 000

SIDEE BAA AMAAHDA LOO CODSADA?

Waxaa arrimaha codsiga ka la xiriirtaa gacanhayahaaga amase "Xafiiska Qaabbilaadda Qaxootiga ee Degmada". Waxay ku siinayaan warbixin dheeraad ah, waxayna ka caawinayaan habka loo buuxiyo foomka codsiga amaahda. Kadib iyaga ayaa codsigaaga u gudbinaayo CSN "Guddiga ammuraha kaalmada iyo waxbarashada ardayda"

AMAAH AAN HOREY U QAATAY MA KORDHINSAN KARAA?

Amaahda aad hore u qaadatay waad kordhin san kartaa haddii:

- aad horrey uu amaahatay heer ka hoo eyaa heerka ugu sareeya, taaso waafaq san tirada qoyska iyo aqalka aad degan tahay.
- aad ka guurto aqal alaabaysan oo aad u guurto aqal aan alaab oollin.
- Qoyska carruur ay dalka Iswiidan ku dhalaan
- qof ehelkaaga ah uu kula soo dego, ehelkuna laga diiwaan geliyay "Xafiiska Qaabbilaadda Qaxootiga ee Degmada".

Ehel waxaa halkaan looga jeedaa afada (xaaska) ama sayga (ninka) amase carruurta aad adiga dhasahy, kuwaaso da'doodu ka hooseyso 21 sano. Labada qof ee isqaba, hab wadajir ah ayaa amaahda loo siiyaa.

(*Xitaa* haddii labo sano ay ka soo wareegatay markii ugu horreysay ee degmada lagu qabbilay). Haddii labada qof isqaba si wadajir ah amaahda loo siiyo, waxaa wadjir u xilsaaraan dib u bixinteeda.

KHARASHKA HAWLFULINTA

Goorta lagu oggolaado amaahda, waxaa laga goynayaa 300 karoon oo ah kharashka hawlfulinta.
Kharashka amaahda lagu kordhiyo waa 100 karoon.

SIDEE BAA LACAGTA LOO BIXIYA?

Goorta la bixinaayo amaahda waxaa la adeegsada bangiga la yirahdo Swedbank.
Labo siyaabood ayaa lacagta loo bixiyaa:

- Lacag-bixinta Swedbank. Waa warqad jeeg ah oo laga sarrifto bangiga Swedbank.
- Xisaab. Iyadoo xisaabta aad bangiga Swedbank ama bangi kale ku leedahay lagu soo shubo.

Haddii aad dooneeyso in lacagta lagugu soo shubo xisaabta bangiga, waa in adiga laf ahaantaada isku hagaajisaa xisaabta aad bangiga kale ku leedahay iyo habka lacagbixinta Swedbank, kaaso loo yaqaanno (SUS).

Isku hagaajinta xisaabta haddii aysan diyaar ahayn goorta lacagta la bixinaayo, ama haddii Guddiga CSN usan haysan tobbanka lambar ee aqoonsiga ee an qabyada ahayn, waxaa xaaladaas lacagta lagu bixin doona habka loo yaqaanno lacagbixinta Swedbank.

GOORMAA LA BILAABAYAA DIB U-BIXINTA AMAAHDA?

Dib-u-bixinta amaahdaa waxaa la bilaabayaa, markii laba sano ay ka soo wareegato maalintii ugu horreysey ee amaahda la bixiyey. Labada qof ee isqaba ee wadajir amaahda loo siiyey, waxaa waajib ku ah in ay hab wadajir ah amaahda dib ugu bixiyaan.

QAYBINTA AMAAHDA

Hey'adda CSN waxay labada qof u qaybin kartaa daynta haddii ay kala tagaan ama isfuraan, sidaas-na ku heshiyeen. Deynta waxaa had iyo jeer loo qaybiyaa labo qaybood oo siman, qof qura-na daynta laguma wareejin karo. Codsiga qaybinta waa in isagoo qoraal ah loo soo gudbiyaa Hey'adda CSN.

Xilliga dib u bixinta amaahda waa 1 – 15 sano, hadba heerka amaahda

Heerka amaahda	Muddada dib u bixinta
< 10% ee lacagta aasaasiga	1 sano
< 40% ee lacagta aasaasiga	3 sano
< 80% ee lacagta aasaasiga	5 sano
< 100% ee lacagta aasaasiga	7 sano
< 110% ee lacagta aasaasiga	8 sano
< 120% ee lacagta aasaasiga	10 sano
> 120% ee lacagta aasaasiga	15 sano

(Lacagta aasaasiga ee 2010 waa 42 400 karoon)

HABKEE LOO XISAABIYAADULSAARKA AMAAHDA?

Dowladda ayaa sannadka kasta go'aamiso heerka dulsaarka amaahda. Waxanna laga soo billaaba maalinta ugu horreysay ee amaahda la bixiyay. Dulsaarkii la bixin lahaa labada sano oo aanan aamahda dib loo bixin ayaa laysku xisaabiyaa, kadib maalinta amaahda dib loo bixin doono ayaa lagu biriyaa lacagtii amaahda. Markaas kadib ayaa dulsaarka lagu xisaabinayaa isugeynta lacagta amaahda.

Dulsaarka 2010 waa 4,9%.

CSN 4001L/0912

SIDEE BAA AMAAHDA DIB LOOGU BIXIYAA?

Caadi ahaan waxaa amaahda dib loo bixiyaa bishiiba hal jeer. Saddexdii billoodba hal goor ayaa warqadaha lacagta lagu bixiyo, kuwaaso tiradooda yihiin saddex (Bishiiba mid) lagu soo dirayaa. Kow iyo labaatan kaaroon oo ah hawl-qabasho ah ayaa sannadkii afar goor la bixiyaa. Haddii Lacagbixinta loola habsammmo, waxaa deynqabaha bisha ku xigta loo so diraa warqad xasuusin ah. Kharashka xasuusinta imminka waa 50 kaaroon.

Kolba kolkii amaahda dib loogu bixiyo, ayaa waxaa kolka hore laga jara kharashkii deynqabaha lagu lahaa, kadib waxaa laga jara dulsaarkii, ugu danbeeystiina amaahda.

DIB U BIXINTA AMAAHDA EE AAN QORSHEYSNAYN?

Deyntu si dhaqso ah ayey u dhammaaneysaa, deynqabahu wuxuu awooda innuu deynta iska bixiyo horranta muddada caadi ah layska bixiyo. Waxaana lacagta lagu bixin karaa iyadoo lagu shuubo *xisaabta bangiga "Bankgiro" 5201-1053 amase tan boostada "Plusgiro" 476 51 01 - 3.* Xaaladaas waa in warqadda lacagbixinta lagu soo qora lambarka daynta, tobbanka lambar ee aqoonsiga, magaca oo dhan iyo adreeska. Haddii aad doonayso in aad lacagta bixiso adigoo hoyga Internetka adeegsanaayo, waa in aad ku isticmaasha lambarka loo yaqaanno OCR-nummer – kaaso ka dalban karto CSN.

HADDII AANNAN DIB U BIXIN KARIN AMAAHDA

Qofka aanan awoodin dib u bixinta amaahda, taaso tusaale ahaan u sabab ah daqligiisa oo hoseeyo, wuxuu codsan karaa dib u dhigida bixinta amaahda "Anstånd" ama in hoos loo dhigo qaybta amaahda la bixiyo. Foomka lagu codsado dhib u dhigidda bixinta amaahda iyo warqadaha lacagta lagu bixiyo isku mar ayaa la soo dira.

Goorta Guddiga u go'aaminaayo codsiga dib u dhigida bixinta amaahda "Anstånd" ama in hoos loo dhigo qaybta amaahda la bixiyo, wuxuu fiirogar ah siinayaa tirada xubnaha qoyska iyo iskudarka daqliga sannadkii ee la canshuuro ee deynqabeyada.

Korsaarkii daynta waa la xisaabiyaa ilaa daynta oo idil dib loo bixiyo. Xitaa haddii lagu oggolaado dib u dhigida bixinta amaahda ama hoos u dhigida qaybta amaahda la bixiyo. Sidaas awgeed xilligaas waxaa sii kordhaayo dayntii.

Nidamka dib u dhigida daynbixinta ee qofka ku nool dal dibedeed wuu ka duwan yahay kuwa dalka ku nool. Warbixin dheeraad ah ee ammurta ku saabsan waxaa lagala xiriiri karaa Guddiga CSN.

Dib u dhigida bixinta amaahda ama hoos u dhigida qaybta amaahda la bixiyo waxaa loo go'aamiyaa hal- hal sano.

DEYNTA SOO LAYSU MA CAFIN KARO?

Deyn-cafis waxaa codsan karo qofkii da'diisu ka sareeyso 65 sano jirro amase curyaanimmo awgood lagu qiyaaso deynqabaha innusan marna shaqaysan doonin.

Qofkii geeriyoodo wa laga cafiyaa deynta.

HOYGA INTERNETKA

Hoyga Internetka ee Guddiga www.csn.se waxaad ka akhrisan kartaa warbixinno ku saabsan amaahda lagu iibsado qalabyada aqalka.

ADREES BEDELIDA

Haddii deynqabaha uu dalka gudihiisa u guuro degmo kale, waa innuu habsaamid la'aan wargeliyaa Hey'adda Ammuraha Canshurta oo ah hey'adda xilsaaran diiwangelinta. Waa innuu isla markaas wargeliyaa Guddiga CSN.

Deynqabaha ku nool dibada waa innuu toos Guddiga CSN la xiriira una wargeliyaa adreeskiisa cusub.

Kaarka adreeska beddelida lagu wargeliyo waxaa laga dalban karaa Guddiga CSN.

WARBIXIN DHEERAAD AH

Warbixin dheeraad ah waxaad ka heli kartaa:
CSN,
Hemutrustningslån
851 82 SUNDSVALL.
Talayfoon: 0771-276 100
Saacadaha talayfoonka: 09.00 – 12.00
Faksi: 060-18 60 06
Boostada elektroonikada:
hemutrustningslan@csn.se
Hoyga Internetka: www.csn.se

Qoralkaan waxaa la helo karaa isagoo ku qoran af-albaani, af-carabi, af-ingriisi, af-fransiis, af-kurdiga waqooyi, af-persi, af-roomani, af-rumeen, af-ruush, BKS, af-soomaali, af-isbaanish, af-kurdiga-konfureed, af-tigrigna, af-turki, af-vietnamn iyo af-badinani. Turjumida waxay xilsaaran tahay shirkada Semantix.